



UNITED NATIONS

NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 49 – 14 Disembar, 2008

Is-beddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Muddada warbixintan, dad rayid ah ayaa ay dhibaato ka soo gaartey isu xoog-sheegadka aan loo meel dayin ee ay keeneen dagaallada ka dhacay gobollada Koonfurta iyo Bartamaha ee u dhexeeya muqaawamada iyo ciidamada Dowladda Federalka Ku-meel-gaarka ah ee ay taageeraan ciidamada Itoobiya. 5tii Disembar, ugu yaraan 16 qof ayaa lagu diley halka kuwo intaa ka badanna lagu dhaawacay degmada Heliwaa ee magaalada Muqdisho ka dib markii la duqeeyey suuqa xoolaha. Sida uu sheegey barnaamijka Dabagalka Dhaqdhaqaaqa dadweynaha ee UNHCR, labadii toddobaad ee la soo dhaafey, waxaa qaraxyadu ku bateen Baydhabo, gobolka Baay. Afartii shil ee lagu soo waramay, ugu yaraan waxaa ku dhintey dersin dad ah waxaana ku dhaawacmey 45 kale markii ay muqaawamadu bambo gacmeedyo ku weerareen ciidamada dowladda iyo kuwa Itoobiya oo maraya suuqa weyn. Xiisadda degaanka ayaa kacsan ka dib markii ay shilalkaasi dhaceen.

Warbixinteedii ugu dambeysay, (*So Much Fear – War Crimes and the Devastation of Somalia* oo micnaheedu yahay: Cabsi Badan – Dembiyada Dagaalka iyo Burburka Soomaaliya ee la soo saarey 8dii Disembar) hay'adda *Human Rights Watch (HRW)* waxa ay ku eedeysay dhammaan qaybaha iskahor-imaadyada Soomaaliya ku lug leh in ay si joogto ah u galaan dembiyo dagaal ayna qayb ka yihiin dhibaataada xaaladda bani'aadamnimada ee dalka. Agaasimaha Afrika ee HRW, Georgette Gagnon ayaa sheegtey in "kuwa Soomaaliya ku dagaalamaya ay rayidka u geysteen dhaawac ka weyn kan ay iyagu isu geysteen." Warbixintu waxa ay ku talisey in la sameeyo guddi xog-baaris si loo joojiyo wax-isu-raacasho la'aanta ayna ugu gogol-xaaraan wada-xisaabtamid.

Toddobaadka dhexdiisa, Hay'adda Sweden ee Horumarinta iyo Iskaashiga ayaa ugu deeqdey WFP Somalia US\$ 251,256 oo lagu taageerayo hawlgalka duulimaadka bani'aadamnimada ee ay waddo UNHAS. Deeqdan ayaa timid waqti ay UNHAS haystaan dhibaatooyin maaliyadeed oo ay keentey rakaab yarida. Deeqdan ayaa hawlgalka UNHAS lagu sii wadi doonaa ilaa bartamaha Maarso 2009. WFP waxa ay dhiirrigelineysaa in sanduuq la wada leeyahay lagu taageero UNHAS maaddama ay fuliso adeeg la wada leeyahay.

8dii Disembar, Midowga Yurub ayaa hawlgalkiisii ugu horreeyey ee ka hortagga burcad-badeedda ka bilaabay biyaha ka baxsan xeebta Soomaaliya. Hawlgalka ayaa la qorsheeyey in lagu gelbiyo afar markab oo ay WFP soo kireysatey oo 15,400 mitric ton oo cunto gargaar ah geyneya Soomaaliya bartamaha Disembar.

Waxqabadka

Qiyaastii 700 oo qoys oo ku nool degmooyinka Xaafuun iyo Karkaar ee Gobolka Bari ee Puntland oo ay saameeyeen daadadkii iyo duufaan-barafeedkii dhowaan dhacay ayaa bilaabay in ay helaan cuntada gargaarka ee WFP. Qiimeyn degdeg ah oo ay wadajir u sameeyeen WFP, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, OCHA iyo NGO-ga degaanka ee HADMA laba toddobaad ka hor ayaa xaqiijisey in qoysaska dhibaataadu saameysay ay si aad ah ugu baahan yihiin gargaar ay ka mid tahay cunto.

Magaalada Gaalkacyo, barnaamij quudin dheeri ah oo ay UNICEF taageerto ayaa socda kaas oo ay ka faa'iideysanayaan 770 carruur nafaqo-xumo ay hayso oo shan sano jir ka yar ah. Qiyaastii 55,000 oo carruur ah ayaa iyagana weli ka faa'iideysanaya quudinta guud ee dheeriga ah ee UNIMIX – oo ay qaybiyeen laba hayadood oo la-hawlgala UNICEF. Toddobaadka dhexdiisa, UNICEF waxa ay 15,000 oo maro-kaneecooyin ah ka qaybisey Jamaame, Jubbada Hoose, iyo 20,000 oo ay ka qaybsiey Beled-weyne, gobolka Hiiraan. 47,000 oo kale oo marokaneeco ah ayaa loo wadaa degmooyinka Diinsoon iyo Qansax Dheere ee gobolka Baay. Ilaa bishii Jannaayo, 230,000 oo marokaneeco ayaa laga qaybiyey Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya

Toddobaadka dhexdiisa, barnaamij cunto-tababar ku beddelesho ah oo ay taageertey WFP oo ahaa tababar akhris-qoris iyo mid xirfadeed ayaa si ku-meel-gaar ah loogu hakiyey Gaalkacyo, Gobolka Mudug,

nabad-gelyo xumada ka jirta degmada daraaddeed. Barnaamijka waxaa lagu beegsaneyey 800 oo gabdho gudaha dalka ku barokacay.

NGO-ga degaanka ee SORDA oo taageero ka heley hay'adda *Danish Refugee Council* ayaa Agab-aan-cunto ahayn u qaybiyey 4,000 oo qoys oo Dad Gudaha ku Barokacay ah oo deggan Carbiska, Xaawo Cabdi, iyo Kax-shiiqaal maalintii ka horeysey maalintii ciidda ee 8da Disembar. Dadkaas oo ku noolaa Muqdisho iyo degaannada ku hareereysan waxaa qoys kasta la siiyey alaabo ay ka mid yihiin, Jiirgaanno (20litir qaada), baco iyo labo xabbo oo marokaneecooyin ah.

Wixii faahfaahin dheeri ah oo xogta Afka Ingiriisiga ah kala soo xiriir: Rita Maingi on +254 734 800 120 – maingir@un.org,

**Xogta Af-Soomaaliga kala soo xiriir Muna Mohamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Website-ka: <http://ochaonline.un.org/somalia>**